



Cod wayn oo kalsooni ah

Qoysaska iyo shaqaalaha PPS ee qaaliga ah,

Maanta waxay maalin wayn u tahay Dugsiyada Dadweynaha Portland. Cod bixiyayaashu waxay cod aqlabiyad ah ku ansixiyeen xeer kayagii maalgelinta daymeed, taasi oo macnaheedu yahay in aanu sii wadi karno qorshahayagii si aan dugsiyadeena uga dhigno kuwa casri ah, badbaado leh, meelo soo dhawayn u leh oo loogu talagalay ardaydeena si ay wax u bartan isla markaana u dhaafaan heerkii la rabay. Waxaan rabaa in mahad celin iga daacad ah siiyo qof kasta oo si adag u shaqeeyey ololihii doorashada – iyo dhammaan dadkiina codeeyay doorashadan. Saamayntani waxaa sanadaha iyo tobanaanka sano ee soo socda dareemi doona da’aha kala duwan ee ardayda iyo dadka reer Portland.

Natiijada ka soo baxday doorashadani waxay sii xoojinaysaa wixii aan arkay tan iyo markii aan noqday kormeeraha ku meel gaarka ah bishii Ogoosto ee la soo dhaafay: Portland waa bulsho si qoto dheer u daryeesha dugsiyadeeda dadweynaha. Kani wuxuu ahaa cod wayn oo kalsooni lagu siiyay macallimiinteeda, maamulayaasheena, shaqaalaheena taageerada iyo guddiga dugsigeena. Waxa uu sidoo kale ka turjumayaa shaqada fiican ee laga qabtay dugsiyada sare ee Franklin iyo Roosevelt iyo Faubion K-8 iyada oo la isticmaalayo lacago laga helay maalgelintii daymeed ee 2012-kii.

Iyadoo ay dheer tahay, dhagax dhiga Dugsiga Sare ee Grant ee cusub (iyada oo la isticmaalayo maalgelintii daymeed ee 2012-kii), waxaanu si dhakhso ah u bilaabi doonaa in aan wax ka qabano arrimaha la xiriiira kiimikada lead, radon, asbestos iyo badbaadada dabka ee dugsiyada ku yaala guud ahaan degmada. Isla mar ahaantaada, waxaanu bilaabi doonaa qorshaha dayactirka weyn dugsiyada Madison iyo Benson, iyada oo la dhamaystiri doono dib u dhisida Dugsiga Sare ee Lincoln iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg. Marka la helo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mashaariicdani, waanu kula wadaagi doonaa.

Mar kale, waad mahadsan tahay Portland, sidoo kalena waad mahadsan tihiin bulshada PPS. Waxaan ku faraxsanahay mustaqbalka dugsigeena.

Bob McKean

Maamulaha Ku meel gaarka ah